# Macluumaad ku saabsan Doorkaaga aad tahay Wakiilka Lagama maarmaanka ah la Aqoonsaday ee Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA)

**Information About Your Role as the Identified Necessary Supplemental Accommodation (NSA) Representative**

| Adiga waxaa laguu aqoonsaday wakiilka macamiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee loogu talogalay: | |
|---|---|
| MAAMULAHA XOGTA KIISKA | LAMBARKA TELEEFOONKA |

**<u>Maxaa laga wadaa wakiilka macamiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA)</u>?**

Sharciga gobolka (RCW) iyo xeerarka Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) (WAC) waxay u baahantahay oggaysiiska qoran ee dhammaan waraaq isdhaafsiga ay ku jirto go'aanada saameynaya xaq u yeelashada DDA, adeegaha DDA, iyo doorashada daryeel bixiyaha loo diro dhinaca macamiilka DDA iyo ugu yaraan hal qof oo kale. Qofkaan kale waxaa loogu yeeraa sida wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA).

"Wakiilka Dayaafadinta Lagama maarmaanka ah ee Dheeraadka ah" macnaheedu waxay tahay qofka qaadanaya nuqulada oggaysiisyada tallaabada qorshaha ee DDA (PANs) iyo waraaqo isdhaafsi kale oo waaxda ah si loogu caawiyo macamiilka in uu fahmo dukumeentiyada una dabakho xuquuqaha macamiilka. Wakiilka NSA waxaa aqoonsaday macamiilka DDA marka macamiilku uusan haysanin mas'uul sharciyeed oona macamiilku codsanayo ama qaadanayo adeegaha DDA.

**<u>Maxay yihiin mas'uuliyadaha sharciyeed ee aan haysto maadaama aan ahay wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA)</u>?**

Kaliya wakiilada ay ka saarantahay wax kasta oo mas'uuliyad sharciyeed ah macamiilka ayaa ah:

- Waalidiinta dhalay, adeer ama aayo u ah, ama korsaday kuwaas oo xanaaneeya ilmahooda/macamiilkooda da'diidu ka yartahay 18;
- Mas'uuliyiinta sharciyeed ee ay maxkamadu u magacoowday macamiisha ah da' kasta.

**<u>Maxay yihiin mas'uuliyadahayga maadaama aan ahay wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee macamiilka</u>?**

Maadaama aad tahay wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee loo magacaabay macamiilka, waxaad qaadan doontaa nuqulo ku saabsan dhammaan Oggaysiisyada Tallaabada Qorshaha DDA iyo waraaq isdhaafsi kale oo DDA ah kuwaas oo loo diro macamiilka.

- Adiga waxaad matashaa ilmaha da'diisu ka yartahay 18 sanno ama caawisaa macamiilka qofka weyn ee DDA si aad u fahansiisid oggaysiiska looga soo diro dhinaca DDA.
- Adiga waxaad ku caawisaa macamiilka tooska hawsha rafcaanka haddii macamiilku uu doonayo in uu kahoryimaado go'aanka.
- Adiga waxaad u shaqaysaa sida wakiilka macamiilka midaas oo ah kaliya ujeeddooyinka qaadashada nuqulada oggaysiisyada iyo in aad ku caawisid macamiilka in uu fahmo oona ka jawaabo. Adigu ma haysatid "awood sharciyeed" si aad ugu sixiixdid macamiilka aan ka ahayn haddii aad tahay sidoo kale waalidka/qofka weyn ee mas'uulka sharciga ah (sid loogu sharxay hoos) ilmaha da'diisu tahay 17 sanno oona kayar ama aad tahay mas'uulka qof 18 sanno jir ama ka weyn.

**<u>In intee la'eg ayaan haysanayaa mas'uuliyadan</u>?**

- Haddii aad tahay waalidka dhalay, adeerka ama aayada, ama korsadaha macamiilka da'diisu kayartahay 18, waxaad haysataa mas'uuliyada sharciyeed illaa laga gaaro taariikhda dhallashada ilmaha ee 18 aad. Waalidku kama tanaasuli karo mas'uuliyada wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee ka saaran ilmahooda yar.
- Haddii aad tahay mas'uulka sharciyeed ee ay maxkamadu u magacoowday ilmaha ama qofka weyn, adigu waxaad tahay qof mas'uul ka ah illaa laga joojiyo mas'uuliyada ilaalinta. Qofka mas'uulka ah wuxuu codsan karaa qofkale si uu ugu matalo wakiilka macamiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA).
- Haddii aadan la lahayn wax xiriir sharciyeed ah macamiilka, waxaad joojin kartaa in aad ahaatid wakiilka macamiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) wakhti kasta adiga oo ku wargelinaya macamiilka iyo maamulaha xogta/kiiska ee DDA.
- Haddii aadan la lahayn wax xiriir sharciyeed macamiilka, macamiilka waxaa laga yaabaa in uu ku wargeliyo maamulahiisa/maamulaheeda kiiska kadibna codsado wakiil Dayaafadin Dheeraad ah (NSA) oo aan adiga ahayn.

**<u>Maxaan sameeyaa haddii macamiilka aan matalayo uusan doonaynin in aan ahaado wakiilkeeda/wakiilkiisa Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA)</u>?**

Haddii aan macamiilku doonaynin in aad ahaatid wakiilkooda Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA), DDA waxay ku caawin doontaa in aan doortaan qofkale.

- Macamiilku wuu diidi karaa in uu aqbalo doorashada wakiilka kaliya haddii asaga/ayada da'deedu tahay 18 ama kaweyn oona wakiilku ahayn mas'uul ay maxkamadu soo dooratay.
- Haddii aad la leedahay xiriir sharciyeed macamiilka, waxaad u matali kartaa macamiilka ayada oo aan jirin asaga/ayada wada shaqaynteeda.

**<u>Midaan ma waxay noqon doontaa mid lacag iigu fadhida</u>?**

Ma jirto wax lacag ama qiimooyin ah oo lagu bixiyo doorka wakiilka macamiilka.

**<u>Qofkeen wacayaa si aan ugu sheego cinwaanka cusub ama lambarka teleefoonka</u>?**

Waxaad u baahantahay in aad wacdid Maamulaha Xogta/Kiiska ee DDA ee la doortay midkaas oo ku qoran dusha sare ee foomkan si aad ugu soo sheegtid isbedelka boostadaada, teleefoonkaaga, ama xaalada sharciyeed macamiilka.

**<u>Imisa xiriir ama wicitaano ah ayaan ka filanayaa dhinaca DDA</u>?**

- DDA waxay kula soo xiriiri doontaa kahor inta lasamaynin qiimeynta sannadlaha ah ama muraajacada, midaas oo ka dhalan karta go'aan uu macamiilku xaq u leeyahay in uu rafcaan ku sameeyo, si aad u xaqiijisid cinwaankaaga boostada. DDA sidoo kale weli way xaqiijin doontaa in aad aqbashid in aad ahaatid wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee macamiilka una fahantid doorkaaga. Aan ka ahayn haddii aad ku wargelisid maamulaha kiiska in aadan doonaynin in aad ahaatid wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee macamiilka, aqbalidaada iyo fahankaaga wuxuu shaqaynayaa illaa 12 bilood.
- DDA waxay isku dayi doontaa in aad kula soo xiriirto kahor inta aysan kuu soo dirin oggaysiiska diidista macamiilka, dhimista, ama joojinta xaq u yeelashada, adeega ama bixiyaha daryeelka si ay kuugu sharaxdo go'aanka iyo xuquuqaha rafcaanka uu haysto macamiilka.
- Maamulaha Xogta/Kiiska (CRM) wuxuu isku dayi doonaa in uu kula soo xiriiro ugu yaraan labbo jeer kahor inta aan laguu soo dirin Oggaysiiska Tallaabada Qorshaha.

**<u>Qofkeen wici karaa haddii aad qabbo su'aalo ku saabsan oggaysiiska ama go'aanka ama hawsha rafcaanka</u>?**

Oggaysiiska Macamiilka ee Tallaabo Qorshe kasta waxaa kamid noqon doona magac iyo lambar teleefoon adiga laguugu talogalay si aad noola soo xiriirtid haddii aad qabtid su'aalo.

**<u>Maxaad iiga sheegi kartaa waxyaabaha ku saabsan hawsha loogu talogalay rafcaanka lagu samaynayo go'aanka DDA</u>?**

Oggaysiis Tallaabo Qorshe kasta ah wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan sida iyo goorta loo sameeyo rafcaanka looga soo horjeedo go'aanka.

1. Macaamiisha DDA waxay xaq u leeyihiin in ay rafcaan ku sameeyaan go'aan kasta oo ay soo saarto DDA midkaas oo saamaynaya oggolaanshaha, diidista, dhimista, joojinta, ama ka laabashada xaq u yeelashadooda, adeega, barnaamijka, ama doorashada daryeel bixiyaha.
   - Macamiilka iyo wakiilkooda Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee la doortay waxaa khasab ku ah in ay helaan oggaysiis qoran oo ku saabsan dhammaan go'aanada saamaynaya xaq u yeelashada, heerka adeega, ama diidista ama joojinta daryeel bixiyaha.
   - Oggaysiiskan waa in lagu sheego taariikhda ay dhaqan galayso tallaabada, sababta iyo WAC ku habboon, xuquuqaha rafcaanka, iyo wakhtiyada loogu talogalay samaynta rafcaanka.
2. Rafcaanada macamiilka waa kuwo uu dhagaysto oona go'aan ka gaaro Qaaliga Sharciga Maamuleed (ALJ) midaas oo lagu sameeyo tooska maamulka dhagaysiga. Dhagaysigan waxaa lagu qabtaa dhismaha DSHS ama tooska teleefoonka. Qaaliga Sharciga Maamuleed (ALJ) ayaa hoggaaminaya kullanka waana la duubayaa.
   - Wakiil qareen looma baahna balse waa mid la oggolyahay.
   - Wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ayaa ku caawin kara macamiilka in uu nafsadiisa ku matalo kiiskiisa/kiiskeeda ama in uu samaysto qareen.
   - Shaqaalayaasha DSHS kuma matali karaan macamiilka meesha uu ka dhacayo maamulka dhagaysiga.
   - DDA waxay leedahay iskuduwayayaal maamulka dhagaysiga ah kuwaas oo fududeynaya hawsha loogu talogalay DDA. Caawiyaasha Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa diyaar u ah wixii ku saabsan latalinta iyo mararka qaar matalaya DDA.
3. Macamiilka ama qofkale oo ku hadlaya magaciisa/magaceeda ayaa u codsan kara maamulka dhagaysiga si afka ah ama qaab qoraal ah.
4. Qayb kasta (macamiilka iyo waaxda) waxaa khasab ku ah in ay keenaan daliil ku saabsan mowduuca khilaafka uu ka taaganyahay. Daliilka waxaa khasab ku ah in uu kusalaysnaado Qaanuunka Maamulka Washington (WAC).
5. Qaaliga Sharciga Maamuleed (ALJ) wuxuu soo saari doonaa go'aan qoran. Go'aankan waxaa khasab ah in uu kusalaysnaado Qaanuunka Maamulka Washington (WAC).
   - Qaaliga Sharciga Maamuleed (ALJ) malahan wax awood ah oo uu ku diido ama isaga indho tiro jiritaanka WAC ama bedelo WAC ama sheego in aysan shaqaynin.
   - Ujeeddada dhagaysigu wuxuu yahay in la xadido haddii DDA ay qaadatay go'aan sax ah ee ku saabsan xeerka waaxda.
6. Dhammaan qaybaha waxay xaq u leeyihiin in ay rafcaan ugu sameeyaan go'aanka horudhaca ah dhinaca Qaaliga Sharciga Maamuleed (ALJ) ee Guddiga Rafcaanada.
   - Guddiga Rafcaanada (BOA) wuxuu u shaqeeyaa DSHS si uu go'aankeeda u noqdo go'aanka u dambeeya ee loogu talogalay DSHS/DDA.
   - Macamiilka wuxuu rafcaan ugu samayn karaa go'aanka Guddiga Rafcaanada (BOA) dhinaca Maxkamada Sare.

Tixraacyada WAC:

WAC 388-825-100 tooska 105

WAC 388-825-120 tooska 165

**Muxuu yahay Foomka Wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee Macamiilka (16-195)?**

- Foomka wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee Macamiilka waa sharaxaad ku saabsan shuruuda Dayaafadinta Lagama maarmaanka ah ee Dheeraadka ah midaas oo loogu talogalay macaamiisha DDA.
- Waloow foomka 16-195 uusan ahayn mid waajib ah, waxaa si adag loo soo jeedinayaa in la siiyo macamiil kasta oo loo doortay wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA).
- Haddii foomka 16-195 la bixiyay, ugu qor gudaha SER sida qayb kamid ah heshiiska wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) si loo noqdo wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) iyo fahanka doorka wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA).
- Fadlan la xiriir wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) ee ah in doorka wakiilka Dayaafadinta Dheeraadka ah (NSA) uusan ahayn mid sidiisa bixinaynin awood sharciyeed midaas oo lagu matalayo macamiilka.